# Dugsiyada Dadweynaha Boston

# Wargelinta Maaliyadeed ee FY25-FY26

David Bloom, Sarkaalka u Sareeya Maaliyada
Blair Dawkins, Ku Xigeenta Sarkaalka Maaliyada
Serena La Rocque, Agaasimaha Miisaaniyada
Jamie Racanelli, Agaasimaha Qorshaynta & Falanqaynta

“

*Cunug kasta, fasal kasta, dugsi kasta oo ka mid ah nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Boston wuxuu leeyahay fursad la mid ah inuu ku gaaro weynaanta dhexdooda sida qof kasta oo kale.*

- Xeerka Daldaloolada Fursadaha iyo Guul Gaaritaanka BPS

*Dhammaan dugsiyadeenu waa inay aqoonsadaan awooda, luuqadaha, dhaqamada, iyo waayo-aragnimada nololeed ee ardaydeenna si ay wax u baraan ugana caawiyaan inay gaadhaan baahiyahooda shakhsi ahaaneed iyo kuwa kala duwan. Xogta ardayga iyo waaya aragnimada noole ee ardaydeena, qoysaska, iyo shaqaalaheennaba waxay soo dedejiyaan baahida degdega ah ee lagu bixinayo ballanqaadka iyo waajibaadka waxbarashada loo dhan yahay iyo xaqa uu arday kasta u leeyahay diyaargarowga kulliyadda, shaqada, iyo nolosha.*

- Qorshaha U Dhanaanshaha Waxbarashada BPS

# Guudmarka FY 24-26



**AJANDAHA**

**FY24**

- Sanad maaliyadeedku waxa uu dhammaaday Juun 30, 2024
- BPS waxay ku gunaanaday miisaaniyada intii lagu jiray sanadka

**FY25**

- Sanad maaliyadeedka hadda, oo soconaya illaa Juun 30, 2025
- Waxaan ku kalsoonahay in aan xiri doono sanadka miisaaniyada
- Cusboonaysiinta Maalgelinta FY25 iyo Xidhitaanka ESSER

**FY26**

- Sanad maaliyadeedka bilaabmaya Julaay 1, 2025 oo soconaya ilaa Juun 30, 2026 (SY25-26)
- Soo jeedinta dhammayska tiran ee misaaniyada Feebarwari 5, 2025

# Xiritaanka Miisaaniyada FY 2024

## *BPS waxay ku dhammaysay sanadka miisaaniyada*

## *34aad oo xidhiidh ah*

| | |
|---|---|
| Miisaaniyada | $1,445,874,991 |
| Kharashka dhabta ah | $1,445,848,692 |
| **Wax soo saarka saafiga ah** | **$26,299** |

# Xiritaanka Miisaaniyada FY 2024



## *Kharashaadka FY24 marka la barbardhigo miisaaniyadda*

Sannad kasta, waxaan ku dadaalnaa inaan u maareyno miisaaniyadda la ansixiyay sida ugu dhow ee suurtogalka ah. Sannad kasta, waxaan aragnaa meelo aan ku kharash gareyno wax ka badan ama ka yar inta lagu jiro habka miisaaniyadda.

- Meelaha ka sarreeya kharashkii markii hore la filayey:
    - Shaqaale ku meel-gaar ah
    - Gaadiidka
    - Adeegyada Cuntada
- Meelaha aanu ku aqoonsanay kaydka shaqaynta oo aanu dib u kala hormarinay lacagaha la heli karo:
    - Mushaharka iyo kaydinta caymiska caafimaadka ee boosaska banaan
    - Faaidooyinka



# Warbixinta Horumarka FY25

# FY25 Saadaasha Maaliyadeed




## Waxaan ku kalsoonahay inaan ku dhamayn doono FY25 miisaaniyada

- Meelaha ka sarreeya kharashkii markii hore la filayey:
  - Adeegyada Cuntada - Sii wadida isticmaalka cuntada qandaraaslaha maadaama Madbakhii Guud la dhisayo.
  - Shaqaalaha Halka Galin shaqeeya - shaqaalaysiinta Maamulaha Baska la Hagaajiyay
  - Caymiska Caafimaadka - Kharashka dhabta ah ee sare usii kacaya

- Meelaha ka hooseeya kharashaadka la filayo:
  - Shaqaalaha Labada Galinba Shaqeeya - Heerka shaqooyinka banaan ee sare u kacay marka loo eego ka hor xanuunkii safmarka ahaa, laakiin way hagaagaysaa
  - Isticmaalka keydka dhammaanaya ee ESSER si loo yareeyo kharashaadka sii kordhaya. (Tusaale. Kharashaadka xagaaga ee kasoo guuraya Sanduuqa Guud ee kusoo biiraya ESSER)

# FY25 Saadaasha Maaliyadeed

***Heerka boosaska banaan Oktoobar waa bilawga si loosoo celiyo heerarkii ay joogeen ka hor xanuunkii safmarka ahaa***

- Heerarka boosaska 1% waxay u dhigantaa qiyaastii $10M kharashka mushaharka.

| FY | FTE dhabta ah | FTE La Qoondeeyay | % La buuxiyay | Kala duwanaas haha laga bilaabo 2019 |
|---|---|---|---|---|
| **2019** | 9,197.6 | 9,395.0 | 97.9% | -- |
| **2020** | 9,266.0 | 9,358.1 | 99.0% | 1.1% |
| **2021** | 9,555.3 | 9,669.6 | 98.8% | 0.9% |
| **2022** | 9,570.1 | 9,988.6 | 95.8% | -2.1% |
| **2024** | 9,493.1 | 10,202.6 | 93.1% | -4.8% |
| **2025** | 9,974.4 | 10,578.3 | 94.3% | -3.6% |

# Dhisitaanka Aasaaska Mustaqbalka

*Bulshooyinka dugsiyada loo dhan yahay ayaa ka caawin doonta xirida daldaloolada fursadaha ardaydeena Madow iyo Brown waxayna bixiyaan adeegyo joogto ah si ay u daboolaan baahiyaha ardayda oo dhan, gaar ahaan Ardaydayada Naafada ah iyo Ardayda barta Luuqadaha badan.*

Shaqada 5 sano ee soo socota waxay u baahan tahay isbedel ku yimaada habka

hadda aan u shaqayno.

- **Dib u eegista maalgalinta dugsiga** iyo ka guuritaanka Maalgalinta Celceliska Ardayga
- Sameynta **maalgashi taariikhi ah** si aad u bedesho dhammaan dugsiyada BPS si ay u taageeraan **fursado waxbarasho loo dhan yahay**
- **U badel raadka jireed ee BPS si aad u taageerto** Khibrada Ardayga Tayada Sare leh

# Horumarka Tacliimeed ee Maalgalinta

**Maalgalinta loo Dhanyahay:**

- $15M ayaa si toos ah loogu maalgaliyay dugsiyada si ay u keensadaan shaqaale dheeraad ah si loo balaadhiyo fursadaha loo siman yahay
- Tababarayaasha waxbarashada loo dhan yahay
- Gunada Kooxaha Qorshaynta ee Loo Dhan yahay si loogu horumariyo dugsiga kuwaaso ku salaysan fursadaha loo dhan yahay
- 98% dugsiyadu waxay leeyihiin Isuduwayaasha MTSS kuwaasoo abuuray qaababka MTSS oo maamula adeegyada lagu qaabeeyay baahiyaha ardayda

**Qorshaynta Barnaamijyada Cusub ee Labada Luuqaddood/Luuqaddaha Badan:**

- Afar barnaamij oo Waxbarasho Laba Luuqaddood ah oo cusub iyo saddex barnaamij oo cusub oo loogu talagalay ardayda dhawaan yimiday inay bilaabaan SY25-26, oo leh laba oggolaansho oo dheeri ah oo la sugayo
- Maalgalinta ku jirta manhajka iyo khayraadka luuqadda dhaladka ah ee loogu talagalay barnaamijyada labada luuqaddood

# Horumarka Tacliimeed ee Maalgalinta

**Tababarayaasha iyo Agabka Akhris-qoraalka Loo Siman Yahay:**

- $1M loogu talagalay Agabyada Waxbarashada ee Tayada Sare Leh
- $2.3M loogu talagalay Goobaha taageerada luuqadda iyo akhris-qoraalka oo ay ku jiraan kuwa ardayad luuqaddaha badan ku hadla
- $2M loogu talagalay hirgalinta agabka taageerada (12 saacadood oo ah waxbarashada sare guud ahaan degmada.) waxbarashada sare ee la xidhiidha tilmaamaha akhriska ku salaysan caddaynta
- $2M loogu talagalay taageerada akhris-qoraalka ku aadan ardayda iyadoo loo marayo Kaaliyaasha Akhriska

**Balaadhinta Xarumaha Dugsiga:**

- 6 Xarumaha Dugsiyada ah oo cusub oo ay joogaan isuduwayaal labada galinba shaqaynaya oo loogu talagalay wadar ahaan 20 Xarumo Dugsi
- Lagu daray Isuduwaha City Wide Hub

# Hawlaha Horumarka Tacliimeed ee Maalgalinta

| | |
|---|---|
| **Qorshaynta Maaliyadeed iyo Hawlaha** | • Waxay hogaamisaa mudnaanta degmada ee **ballaarinta helitaanka badbaado, caafimaad leh, goobo waxbarasho oo tamar hufan** taasoo qayb ka ah Qorshahayaga Dhismayaasha Muddada Dheer.<br>• **Taageerada furitaanka dhismayaal cusub**, sida dhismayaasha Carter, JQUS iyo Horace Mann. |
| **Gaadiidka** | • **Iibinta iyo Hirgalinta Zum** si loo hagaajiyo la socoshada baska ee wakhtiga saxda ah, wax ka badalka wakhtiga saxda ah, iyo korodhka boqolayda wakhtigii loog talagalay madaama oo hirgalintu sii socoto.<br>• **20 bas oo elaktarnoogi ah FY25**, libinlaabka cabbirka gaadiidka. Dalabyada 54 bas oo cusub iyo 3 dib loo hagaajiyay oo ah basaska EV sanadkan. Goobaha dabaynta ee ku yaala beerta baska labaad. |
| **Ciyaaraha oradka** | • **Hagaajinta tayada quruxda jiimamkeenna iyo goobaha ciyaaraha** oo ay ku jiraan iftiiminta, meelo wakhtiga lagala socdo oo cusub, qolalka biraha jiimka, iyo dib u cusboonaysiinta goobaha tababarka ee ku yaala Madison Park.<br>• **Awoodda dhismaha** iyadoo la isticmaalayo nidaamka Isuduwaha Ciyaaraha Gobolka. |
| **Taageerada Ardayga** | • **Balaadhinta barnaamijyada la bixinayo** oo ay ku jiraan Soo Celinta Caddaalada iyo Badqabka iyo soo dhawaynta kooxaha dugsiga.<br>• **In ka badan 2,700 oo carruur ah oo kujira barnaamijyo** ay ku jiraan shucuur bulsho, tacliin iyo koolaj iyo barnaamijyo shaqo (sida Fursad Shaybaadhka). |
| **Shaqaalaha** | • **Maalgalinta kor u qaadida shaqaalaha kooxda Mushaharka qaadata**, korinta kooxda laga bilaabo 6 ilaa 11, si loo hubiyo in mushaharka wakhtiga ku haboon, farqiga mushaharka yar iyo hufnaan dheeraad ah ee habaynta mushaar bixinta. |

# Horumarka Maalgalinaha Kor Loogu Qaadayo Qoyska iyo Bulshada

Khadka Caawinta BPS wuxuu dhammaystiray 25,000 "wicitaan" oo ay lasoo xidhiidheen Qoysaska BPS, Shaqaalaha, Xubnaha Bulshada iyo Ardayda - tan waxa ku jira wicitaanada, iimaylada, iyo imaanshaha billaa ballanta ah. Shaqaalah waxa la siiyay awoodda toddobada luuqaddood.

In ka badan 7,000 oo arday ayaa ka qaybqaata barnaamijka xagaaga oo ay soo xaadireen in ka badan 80%.



# Qorshaynta FY26

# FY26: Dhisida Asaaskeenna

Sanadkii FY25, waxaan joojinay isticmaalka Qoondaynta Maaliyadeed ee Ardayda si loo hagaajiyo miisaaniyada dugsiga. Taa baddelkeeda waxaan:

- Samaynay hagaajin lagu samaynayo miisaaniyada iyadoo laga bilaabayo heerkamaalgalinta jirtay ee dugsiga
- Kor u kac ama hoos u dhac ku salaysan tirada fasallada (dugsiyada hoose) ama isbeddelka awoodda (dugsiyada sare).
- Maalgelinta mudnaanta la siiyo ee agabka waxbarashada ee ardaydeena qaba baahiyaha ugu sarreeya iyada oo loo marayo hawlaha loo dhan yahay iyo taageerada ardayda luqadaha badan ku hadasha.

Sanadka FY26 mudnaanteennu waxay sii ahaanaysaa joogtaynta miisaaniyada dugsiga iyo hubinta maalgalinaha baahiyaha ugu badan ee ardaydeenna. Waxaan

- Sii wadaynaa inaan wax ka baddel ku samayno awoodda/fasalka iyadoo la isticmaalayo nidaamkii hore
- Balaadhinta maalgalinaha hawlaha loo dhan yahay.
- Maalgelinta waxbarashada labada luuqaddood ah iyada oo la samaynayo barnaamijyo dadka cusub iyo labada luqadoodba ah ee dugsiyada iyo sii wadida maalgelinta buuxda ee wixii isbeddel ah ee looga baahan yahay adeegyada ESL.

# Diiwaangelinta BPS ayaa hoos u dhacday tobankii sano ee la soo dhaafay, laakiin dhawaanahan way xasiloontay



# Isla wakhtigaas, waxa isbeddelay baahida ardayda aanu u adeegno




*Includes all Students with Disabilities and MLs with an ELD level of 1,2 or 3. Includes all MLSWDs.*




**Mudnaanaha Soo baxa ee FY26**

# Soo jeedintayada FY26 waxay ka tarjumaysaa miisaaniyad deggan sanad dugsiyeedka 2025-26

- Iyadoo la raacayo taariikhda miisaaniyadii degsanayd sanadkii tagay, maalgalinta BPS waxay noqon doontaa mid sidii hore kusii socota

- Balaadhinta Maalgalintu waxay sii wadaa mudnaantayada muhiimka ah ee:
    - Waxbarasho Loo Dhan yahay
    - Balaadhinta barnaamijyada labada luuqaddood
    - Taageerooyinka tacliinta iyo MTSS
    - Balaadhinta dariiqa dugsiga sare

- Qorshaha Tas-hiilaadka ee Mustaqbalka Fog: Hirgelinta isbeddelada iyo u diyaargarowga talooyinka mustaqbalka ee la xidhiidha xidhitaanka, isku darka, iyo dib u habeynta dugsiga.

# Istaraatijiyadaha Lagu Aqoonsanayo Waxtarka

Marka la joogo dugsiyada, waxa aanu xaddidaynaa dhimista isbeddellada la xidhiidha qorshaha dhismayaasha muddada dheer iyo xidhitaanka fasalka sababta oo ah isdiwaangalinta hoos u dhacday.

Kooxaha Xafiiska Dhexe waxay ku shaqeeyeen hab miisaaniyad ku salaysan eber si loo aqoonsado waxtarka.

Waax kasta waxa loo sheegay inay ku shaqayso miisaaniyadooda hadda, aqoonsadaan yaraynta kharashka ay bixinayaan markasta oo kharashku kordho.

Dhinacyo xadidan oo kharashku kordhay waa Xarunta Adeegda Miisaaniyada Dugsiga. Tusaalayaasha qaar kamid ah korodhkani waa:

- Kharashaadka Caymiska Caafimaadka ee degmada guud ahaan
- Kharashaadka Laydhka iyo biyaha ee degmada guud ahaan
- Waxa ka baxsan fiiga waxbarashada gaarka ah ee degmada iyo korodhka kharashaadka gaadiidka

# Jadwalka Xilliga Miisaaniyadda:

Fursadaha Ka qaybgalka Bulshada
Wadahadallada Degmada
Gudaheeda/Wakhtiga kama dambaysta ah

**OKTOOBAR**
- Sawirka is diiwaangelin ta hore
- Miisaaniyadda dayactirka xafiiska dhexe

**NOOFEEMBAR**
- Saadaasha diiwaangelin ta ayaa la diray
- Ka dooda mudnaanta maalgashiga degmada

**DISEEMBAR**
- Dugsiyadu waxay helaan qoondo miisaaniyadeed
- Jadwalka Wareega Sinnaanta Bulshada & Cusboonaysiinta Miisaaniyadda Guddiga Dugsiga

**JANAAYO**
- Goleyaasha Rugta Dugsigu waxay dib u eegaan miisaaniyadda dugsiga
- Shirarka wada shaqeynta ee Miisaaniyadda Dugsiga

**FEBRAAYO**
- **Ee 2/5: Miisaaniyadda degmada oo la horgeeyay guddiga dugsiga**

**MAARSO**
- Markhaati/dhageysiga Guddiga Dugsiga
- **Ee 3/26: Guddiga dugsiga ayaa u codeeya miisaaniyadda degmada**

**ABRIIL MAAYO**
- Dhageysiga Miisaaniyadda Golaha Magaalada

**JUUN**
- Golaha deegaanka ayaa u codeeya miisaaniyada magaalada

**LUULIYO**
- Bilowga Sannad maaliyadeedka cusub

Sannad-maaliyadeedka Dugsiyada Dadweynaha Boston waxa uu socdaa Luuliyo 1 - Juun 30; Inta badan horumarinta miisaaniyada sanad xisaabeedka soo socda ayaa dhaca inta u dhaxaysa Noofeembar iyo Maarso.

# Su'aalaha

# Lifaaqa



# Qorshaynta Dhamaadka ESSER

Isticmaalka deeqaha sannadaha badan iyo dabacsanaanta ESSER ee degitaanka jilicsan ee degmada

| Isha Maalgalinta FY25 | Dhamaadka Sanadka maaliyada | Fursad |
|---|---|---|
| Lacagaha Guud | 6/30/25 | Mala jiro Ikhtiyaar Hor u Qaadasho |
| Xuquuqda I | 8/31/26 | Xuquuqda I waa deeq 2 sano ah oo leh 15% horay loo sii wado iyo marka laga reebo 3dii sanaba mar. |
| Deeqaha kale ee Xaqa loo leeyahay | 8/31/26 | Xuquuqda I IIA, III, IV iyo IDEA waa deeqo laba sano ah oo aan lahayn wax horay u socod ah oo ugu badnaan. |
| ESSER | 9/30/24 | Deeqaha ESSER III waxa la isticmaali karaa ka dib dhamaadka deeqda ilaa inta ay ku jiraan 9/30/24 |
| Dare Damiye | Aan lahayn | Qaadashada ugu badnaan waxay la mid tahay sheegashooyinka wareegga ee sannadkii hore. FY25, midani waxay noqon doontaa 24.9M |

# Deeqda Guud iyo ESSER

## Deeqda Guud iyo ESSER (FY21–FY25)

Lacagaha ESSER III waxa lagu kharash gareeyaa si istiraatiji ah loo yaraynayaa saamaynta hoos u dhaca maaliyadeed ee ESSER.



# ESSER Waxay Xidhaysaa

| Mawduucyada | Wakhtiga kama dambaysta ah | Fiiro gaar ah | Xaallada | Tirada |
|---|---|---|---|---|
| Wakhtiga Deeqda | 9/30/24 | Oo ay ku jiraan kharashaadka shaqsiga ah iyo kuwa aan ahaynba | Waa la dhammeystiray | $241M (87%) |
| Wakhtiga Kama Dambaysta ah ee Sharciga ah | 9/30/24 | Samaynta qandaraasyada iyo bixinta Amarada Iibka (PO's) | Waa la dhammeystiray | |
| Xaraashka Qadiimiga ah | 12/31/2024 | Dhammaan kharashaadka laga soo bilaabo ka hor 9/30<br>Kharash ka dhan ah PO's Waajibka noqday 9/30 | La dabagalo | $9.5M (3%) Kharash garoobay<br>$26M (9%) Hadda Socda |
| Xaraashka Dib Dhacay | 11/30/25 | Dhammaan kordhinta xaraashka waxaa ansixiyay DOE & DESE. Waxan diirada inaan kharash garayno dhammaan 6/30/25 | La dabagalo | $3.5M (1%) |
| **Wadarta Guud ee ESSER III** | | | La dabagalo | $276M |



# Dulucda Diiwaangelinta FY26



**Isdiwaangalinta Socota ee BPS:**

# Wadarta isdiiwaangelinta waa ay xasiloontay iyadoo ay ugu wacan tahay qulqulka ardayda cusub ee luuqadaha badan ku hadasha




- Diwaangalinta waxay korodhay 978 arday intii u dhaxaysay Oktoobar iyo Juun ee sannad dugsiyeedkii hore iyo 700 oo arday ka hor labada sanad dugsiyeed.
- Kobacani waxa keenay ku dhawaad arday cusub oo luuqaddaha Badan Ku Hadasha oo timiday.
- Kobaca badhtamaha sanadka ayaa xasiliyay wadarta isqorista dhowrkii sano ee la soo dhaafay.



**Isdiwaangalinta Socota ee BPS:**

## Isdiiwaan gelinta dugsiga hoose waa xasiloontay, laakiin hoos u dhaca sanadka ka hor wuxuu saameyn doonaa isdiiwaan gelinta dugsiga sare sanadaha soo socda




- Is diwaan galinta fasalada K2 ilaa 5 waxyar ayaa dib loo soo celiyay sanadkan, laakiin 4,818 arday (19%) ayaa ka hooseeya SY1516.
- Is diwaan galinta fasalada 6 ilaa 8 waxyar ayaa dib loo soo celiyay sanadkan, laakiin 1,520 arday (14%) ayay ka hoosaysaa halkay joogtay 5 sano kahor.
- Fasalka 9 ilaa 12 is-diiwaangelinta ayaa laga yaabaa inay hoos u dhacdo sanadaha soo socda maadaama kooxo yaryari ay da'doodu ka weyn tahay nidaamka.



# Hoos u dhaca dugsiga hoose waxaa keena dhalmo yaraan dadka deegaanka ah soo waajahday iyo fasalo K2 oo yaryar oo soo galaya una kala guuraya nidaamka




- Waxa jira xidhiidh joogto ah oo u dhexeeya tirada dhalashada deganaanshaha Boston iyo tirada ardayda BPS K2 5 sano ka dib.
- Dadka Deegan Boston Dhalistoodu hoos bay u dhacday tobankii sano ee lasoo dhaafay, taasoo horseeday in kooxaha K2 ay yaraadaan.
- Ku soo qul qulka ardayda ML ee dhawaan yimiday ayaa ka dhigaysa is-diiwaangelinta K2 mid xasiloon in kasta oo ay yartahay tirada dhallaanka deegaanka.

**Isdiwaangalinta Socota ee BPS:**



**Isdiwaangalinta Socota ee BPS:**

# Tirada MLs iyo SWDs ayaa korodhay iyadoo wadarta isdiwaan galintu hoos u dhacday, taasina ay horseeday in fiirsasho la siiyo baahida




**Includes all Students with Disabilities and MLs with an ELD level of 1,2 or 3. Includes all MLSWDs.*

- Laga soo bilaabo SY1516, tirada MLs iyo SWDs waxaa koray 3,313 arday (20%), halka isdiiwaangelinta dhammaan ardayda kale ay hoos u dhacday 10,756 arday (28%).
- Inta badan koritaanka u dhexeeya baahiyaha sare ee ardaydu waxay dhaceen 3 dii sano ee u dambeeyay, waxa sababay korodhka asaasiga ah ee tirada MLs oo ay weheliyaan heerarka hoose ee aqoonta Luuqadda.



# Tani kaliya maahan astaan BPS - Isdiiwaan gelinta degane ee K2 Boston waxay hoos u dhacday 22% ka badan 9 sano




- Diiwaangelinta K2 ee dadka degan Boston ee dhammaan noocyada dugsiyada ayaa hoos u dhacay 1,278 arday, ama 22%, inta u dhaxaysa SY1314 iyo SY2223, iyadoo hoos u dhacii ugu waynaa uu dhacay inta lagu jiro aafada.
- Xaqiiqda ah in diiwaangelinta K2 aysan wali dib u soo laaban waxay soo jeedinaysaa in tani aysan ahayn kaliya saameynta cudurka caalami ah.
- Isdiiwaan gelinta dadka degan Boston ee dhammaan fasalada ayaa sidoo kale hoos u dhacay 12% in ka badan 6 sano, min 79,016 SY1617 ilaa 69,522 ee SY2223.

**Isdiwaangalinta Socota ee BPS:**